# Kawaanka Maka-Durdure
# iyo
# Kalkii Sheekh Muxumed Raage
# (IHUN)

Mareegta Farshaxan
Sebtemebr 2013
Qaybtii 1aad

*Duligaan ku noolayn marnaba kama daraateene*
*daaraha burburay ee madfaca lagu duqaynaayay*
*dahab iyo damaar iyo intii duunyo lagu waayay*
*intii diric shahaiidiyo intii danab ku naafowday*

*inta caydh u soo dibad baxdee  daxandaxoonaynin*
*dir-xunkaad dhamayseen ayaan kaga dawoobaaye*
*nimankii lahaa duub-casta iyo yayda daba joogta*
*nimankii daluumaha xabsiga iilka nagu diiqay*

*nimankii dibnaha eegayee  hadalka noo diiday*
*nimankii dubkoodi gubnaa aragu diidaayay*
*daymadooda nimankii indhaha dab iga leefaayay*
*halkaan dabada saaraba kuwii igu dul-meeraayay*

*magacyada dugaaga ah kuwii darajo moodaayay*
*dabar-goynti baan nahay kuwii marinka loo daayay*
*nimankii dadkay soo xidhaan kiish la daba qaado*
*madax-furasho lagu doonayee duunka ka colownay*

~~~ ~ ~~

*dimaqaraadi loo simanyihiyo daacad ku hogaansha*
*dadka waa la naanaabiyee dawga ku hagaaja*
*milatari baa nasoo daashadee dib uga faalooda*
*nin kuu digay kumuu dilin sidaa qaba dareenkeeda*

*damal aan la jarin baan ahee daysta midhihiina*
*dan qudhaynu wad leenehee daaf u wada jeeda*
*dabku yii iga seexanine dogobyo weyn saara*
*daroorimad waan necebehee daadka iga moosa*

Maansadii Dardaaran ee Abwaan  Cali Xasan Bamfas
~~~

“Adiga lee lagu dilaa , go’a ii daana waad leedahay..sii daa hawlaa noo socotee” ayaa ku soo dhacey dhagaha  Sheekh Muxumed Raage (IHUN). Sheekha oo ka yaaban wiilkan yar ee dhiiran,aqoona aan u laheyn raganimadiisa ayaa si  ay ka muuqato murugo ugu celiyey “adeer go’ a ii sii daa kaasaaban haystaa waxaan korka iska saaree” . Intaa markii la is dhaafsadey ayaa dadkii uu Sheekhu kula jiray jiray ee dilka loo wada ayaa mar kaliya isla booday  kuna dhawaaqey “ waar  isagoo sheekhu go’iisa sita  dil ee ha ka qaadinee u sii daa” .

Dadkani oo ka kooban 51 qof ayaa  waxaa ku jira aqoonyahanadii, waayeelkii iyo odayaashii ummada u dhalatey  wadanka Soomaaliland. Waxaa inta badan la soo qabqabteyka dib markii ciidamada SNM soo galeeen magaalada Burco oo ku beegnayd May 27, 1988. Waxaaney ku xidhnaayeen xarunta Nabad-sugida. Hase yeeshee ciidamada SNM oo aad ugu soo dhawaadey xarunta, gabood fiicana ka dhigtay godadka biyo mareenka eek a danbeeya Dhakhtarka Hargeysa ayaa halis galiyey xarunta. Sidaa darted ayaa go’aan lagu gaadhey in intan la geeyo badhka ugu weyn xilligaa oo ahaa Maka Durdure si qoorta loogu dheereeyo.

Ninkii ayaa xanaaq cirka isku shareeray, kuna hanjabey inuu go’an ka qaadayo Sheekha. Horaa loo yidhi libaax nimaan garaneyn baa lax ka ridee, haddii uu ogaan lahaa askarigan sheekh Muxumed Raage (IHUN) wuxuu galo iyo wuxuu guddo  go’iisa inuu taabto iska dhaafee, meel u dhaw  muu soo istaageen.

*Waxay geli-fardoodaba   markii la isku soo gaadhay*

*Guryo-keente Maan-deeq intaad gaydh u dirirteene*

*Allaylehe abaal baw gasheen gabiga Soomaale.*

*Waxse iyaba waa guul-darree gorof ku maalaaya*

*Oo aan Gobaad loogu tegin gaalo-ka-hadheene;*

*Adigiyo genkaagii halgamay waa ka garanuuge.*

*Gorayeey dad-weynuhu hashuu gacan ku soo hooyey*

*Gooraan nimaan raadin baa gaawahaw sida e.*

*Waa taa candhadi giigsanayd daysay godolkiiye .*

*Hays odhan wax gaaraa ku helay garasha-dheeroowe*

*Gasabkoodi may helin raggii kula gudboonaaye.*

Maansada Gashi ee Abwaan Maxamed Xaashi Gaarriye (IHUN)

Intaa markii la is dhaafsadey ayaa askari kale oo meel aan sidaa u fogayn joogay yidhi "xadhigan aan hayo ayaa wada gaadhaya ee iska sii daa go'a odayga". Sidaa ayuu go'ii Sheekh Muxumed Raage(IHUN) ku badbaadey maalintaa. Askariga kale wuxuu markaa isku xidhxidhayey tiro ku dhaw ilaa 9 qof oo sida xoolaha inta la iskugu xidhxidhayey ka dibna xaajiyad agtaagneyd sidii gadbad sonkora lagu rarayo lagu tuurayey.

Xaajiyada waxay u dhaqaaqeysay dooxa Maka-Durdure oo dadkii isku xidhxidhnaa lagu tuurayey, ka dibna ciidamo u diyaar ahi xabbad ooda kaga qaadayeen ilaa dhaqdhaqaaq la waayo. Waxaa sidoo kale meel aan ka durugsaneyn joogtay cagafta Buldoser-ka ah oo dhinaca u durkinaysay ciiddana ku rogaysay. " Markii ciidda ay cagaftu igu rogaysay ayaan qayliyey, dirawalkii cagafta wadey ayaa naxey oo intuu soo degay xadhigii iga furay,iguna yidhi oradoo intaaney soo noqon geedahaa qaad oo Isha Boroorama meel aad ku gabato ka raadso" ayuu yidhi wiil ka badbaadey goobtaasi.

Xaggaagii 1988[kii] ayna bisha Juun 9[dii] oo aheyd maalin Jimce ah ayaa ciidanka SNM ee ku jiray biyo-mareenka dhinaca woqooyi ka xigga dhakhtarka weyn ee Hargeysa ay ku soo siqayeen xaruntii nabad sugida. Waxaa soo gaadhey ciidanka oo ku soo biiray ciidan ka yimid dhinaca Idaacada soona dhex maray xaafada Goljano.

Maamulkii ka joogay dawladii jamhuuriyadii Soomaaliya degaanka ayaa go'aan ku gaadhey in si aaney u dhicin dhacdadii Madheera maxaabiista la geeyo badhka Maka-Durdure. Ciidamada SNM oo uu Maxamed Cali hogaaminayey ayaa May 29[dii], 1988[kii] jabshey jeelka Madheera, kalana baxey dhamaan maxaabiistii halkaa ku xidhnayd.

Waxaa markaa joogay  magaalada Hargeysa wasiirkii gaashaandhiga Aadan Gobyo, Ra'iisal wasaarihii  Ina Cali Samater, Taliyihii qaybta 26aad  Dad-qalkii Hargeysa Morgan, taliyihii nabad sugida G/Dhexe Jaamac Xasan Aadan (Shaafi),iwm.

Waxaa aad loogu kalsoonaa hawsha  dilka ah ee ka socotay  kawaanka Maka- Durdure inay  yareyn doonto  kaalmada  dad ahaan ay heli karayeen ciidamadii SNM oo Hargeysa inta badan markaa maamulayey.Halkaa waxaa  xilka  hayey oo hawshaa loo caleemo saarey  saddex xidigle Ducaale Ganaane iyo hal xiddigle Axmed yare.

Sheekh Muxumed Raage(IHUN) wuu ka badbaadey dilkaa loo qorsheeyey oo bishii Juun 10, 1988  ayuu ka mid noqday koox  la yidhi  u gudbiya jeelka magaalada Hargeysa ee ku yaala dugsiga Sheekh Baraawe agtiisa.
Sheekha  oo aad u anfariirsan, wajigiisan ay ka muuqato argagax iyo yaab iskaalmeystay ayaa soo galay qolka  xilli barqo ah. Askartii wadey markay gudihii ku hubsadeen ayey iska noqdeen, quful weyna albaabkii ku dhufteen.Sheekhu wali wuu didsan yahay.

Wuxuu  isagoo daal maskaxeed ka muuqdo  dabada la helay gogol ka koobneyd jawaan, buste iyo go' la isdul-saarey ka koobnayd. Dadkii qolka kula jiray oo dhan ayaa qaadan waa ku dhacey, wayna  garan waayeen waxa Sheekha ku soo dhacey,cidna waydiin kulama dhicin ee qof waliba niyada ayuu ka yidhi "Bal Sheekhu ha nasto oo neeftuurku ha ka  yaraadee yara suga"

la soco qaybaha danbe
Ururintii iyo tifatirkii
Fu,aad  Sheekh  (somaliland@farshaxan.com  )
 Bahda mareegta Farshaxan
www.farshaan.com   iyo www.farshaxan.org

# Kawaanka Maka-Durdure
# Iyo
# Kalkii Sheekh Muxumed Raage (IHUN)

Mareegaha Farshaxan

Sebtember,2013

Qaybtii 2aad.

*Qabrigii malyuumaad Muslimiin ah lagu guray*
*Halkii mudantii reerkiyo dhalintii maanka laheyd*
*Mugaga aarkiyo maska loogu xidhi jiray*
*Yaan maandhayaaloow maansada ka soo diray*
*Maarshaal nin gaadhoo margiyada caseystiiyo*
*inankii miskiin iyo nacas loo malaynayn jiray*
*halkay maanta siman yihiin*
*Yaan maandhayaaloow maansada ka soo diray*
*Doqon milantey ciil iyo nin ku magay waxeegii*
*Doqon milantey ciil iyo halkii geesigii magay*
*maandhaaf ku kala dhacey*
*Yaan maandhayaaloow maansada ka soo diray*
Maansada Muran-Reeb ee abwaan Ibraahin Gadhle(IHUN)

Taliyihii Xabsiga dhexe ee Hargeysa ayaa ka tirsadey ciidamadii watey tiknikada ee hor iyo dababa kacayey maxaabiista dilkii kawaanka Maka-Durdure laga soo dhaqaajiyey. Waxaa la isla gartey in odayaashan loo adeegsan karo dajinta iyo dib-u-soo celinta shicibka ka qaxey Magaalooyinka Hargeysa, Burco,iwm, marka "afartan injirta leh" ee yara xoogeystay laga guuleysto.Waa sida ay hadalka u dhigeen Ina Cali Samater iyo Afweyne Bare oo khadka foonyaha ku wada xidhiidhayey.

Inta aanu taliyahaasi maxaabiistaa ku xerayn qolka loogu talo galay wuxuu u jeediyey khudbad. "Annagu waxba ma soo qabqabano, dilna idinkumaanu xukumin,hase yeeshee waxaa la idiinku soo gudbiyey xabsigan inaad ku xukuman tihiin dil-suge.

Dilkaasi mar kasta wuu dhici karaa. Dhib idiin geysan mayno intaad nala joogtaan annagu, waxaanse xoog dheeraad ah ama ilaalo dheeraad ah saari doonaa Yaasiin Ismaaciil Maygaag oo aanu wada joognay gobolada dhexe.Sarkaal sare ayuu Yaasiin halkaa ka ahaa, waana nin ciidan ah oo tababaran…………" Ayaa ka mid ahaa khudbadii taliyaha Xabsiga.

Dadkii waxay mar kaliya wada eegeen dhinicii uu joogay Yaasiin. Hase yeeshee Sarkaal Sare Yaasiin Ismaaciil Maygaag wuu dhool-cadeeyey,taliyaha oo ay si fiican isku yaqaaneena hadal umuu celin.

*jidhku wuxuu dubaaxshaa damqadaa halbawluhu*
*xididdadu dorooraan ama dhiiga daadshaan*
*afku hadalka daayaa dibniihiisa haystaa*
*doqon kaa nasiib lihi marka ay ku dooxdee*
*birta kaala daashee kugu celiso daabkee*
***Abwaan Maxamed Ibraahin "Hadraawi"***

Intaa ka dib, ayaa sidii xoolaha dabada laga maray maxaabiistii loona hogaamiyey qolka dil-sugaha markaa loo qoondeeyey.Waxaa qolkaas ku sii jiray askar ay haybtoodu soo soocday oo ka tirsanaa ciidamada gaaska koowaad ee deganaa agagaarka Arabsiyo. Askartani waxay kooxdan la wadaagaan xukunka dil-suge.Taliyahaasi dadaal intuu karayey inuu dhibta uu geysan karo yareeyo wuu isku dayey.Waxaanu ogolaadey in dil-sugayaashu xidhiidh la yeelan karaan dhawr oday oo meherado ku lahaa ka soo horjeedka xabsiga,aaney u suurtogalin inay qaxaan oo meheradahooga iska joogay sida Aw Maxamed(IHUN) oo Jeelka ka soo horjeedkiisa tukaamo ku lahaa ay askarta jeelku wax ka iibasato iyo Gaaxnuug Barre.

Sidoo kale ayuu taliyahaasi ogolaadey in 24ka saacadood hal mar la siiyo raashin inay "iska dhintaan" dil-sugayaashani ka ilaalin kara,naftana gaadhsiin kara intay dilka loo qoondeeyey uu dhacayo .Halkaa mar waxaa la siin jiray maxaabistan ku dhawaad shanta galabnimo.

Muddo ayey sidaa loo qorsheeyey hawluhu ku socdeen.Ciidamadii ilaalinayey xabsiga dhexe ayaa didmo iyo kala-yaac muujiyey ka dib markay SNM-tu soo dhawaatey sidii oo SNM-tu ay ka war heleen odayaasha xabsiga la keenay. SNM-ta waxaa kaalmeynayey aqoon ay u lahaayeen guryaha ku xeeran xabsiga,xaruntii xisbiga ee ka soo horjeeda wasaarada warfaafinta Soomaaliland oo gacanta ugu jirtay,ayna ka arki karayeen dhaqdhaqaaq kasta oo jeelka agagaarkiisa iyo gudihiisaba ka socda.Ciidanka faqashta ayaa dhinaca Illaahay lagaga riday baqdin joogto ah.

Sidaa darteed ayaa taliskii Afweyne go’aansadey in ciidamadii Sheekh Biliso ee Soomaali-Aboo la keeno xabsiga,laguna amrey inay difaac uun kaga jiraan dhufaysyo lagu xeeray jeelka.

Tani waxay ciidamadii SNM-ta ku khasabtey inay gurigaa xisbiga dusha uga baxaan,toogashana la beegsadaan askarigii dhaqdhaqaaq ku sameeya gudaha xabsiga iyo dibadiisaba.Taliyihii xabsiga ayaa markan u badaley xilligii maxaabiista loo keeni jiray cuntada cadceed dhaca ka dib. Waxaa dhawr jeer dil toogasho SNM-tu ku dishay dhawr askari oo cuntada siday ama gudaha xabsiga hawlo ka wadey.Sidaa ayuu ku istaagey askari dhaqdhaqaaq u badheedha inta cadceedu soo jeedo.

Tani waxay kordhisay in askartu dhaqdhaqaaqoodu noqdo habeenada gudcurka ah.Qofkii magaciisa la yeedhiyo waa loo ducayn jiray,dib danbena looma arki jirin.Qofkuna isagood moodo neef arkaya daabka middida ayuu cagaha isdaba dhigi jiray.Sidoo kale ayaa oday ka mid ah maxaabiista waxaa quraac boorash ah u samayn jiray hablo maxaabiis ahaa oo aroortii si deganaan iyo ka dhuumasho qoriga liishaaman ee SNM-ta loogu saari jiray.

Waxaa la badalay taliyihii xabsiga,loona badaley Madheera.Waxaa markan la keenay taliye ku-meel gaadh ah.Taliyahani wuxuu aqoon fiican u lahaa dhawr ka mid ah odayaasha,sidoo kale ayey odayaasha qaar ka mid ahina aqoon fiican u lahaayeen ilaa aabihii.

Dabacsanaan ayaa laga filayey.Hase yeeshee hawshii way sii korodhay,raashinkii tayada lahaa waxaa loo badalay in qof walba cadceed dhaca la siiyo koobka shaaha ee dhaglaha ah muggii oo boorash la biyo-dhiciyey ah.Caagada saddexda litir ah oo biyo ah la isku siiyo saddexdii qofba hal caagad.Xilliga wax isa siintu ismay badalin oo waa 24kii saacadooodba hal mar.

Waa aroor barqo ah,dadka qaar hurdaan,qaarna soo jeedaan.Hurdadu waxay iska aheyd salal. Dhawr iyo lixdan qof ayaa qolka(hangarka) ku wada jira.Waxaa mar kaliya si kadis ah ku soo galay qolkii askar didsan,si toos ahna u abaarey gogoshii Sheekh Muxumed Raage(IHUN). “Soo bax adigaa lagu rabaayee” ayaa mar kaliya ku wada dhacey dhagihii Sheekha iyo maxaabiistii kale. La wada nax, dhan loo qaadana la garan waa.Qof waliba wuxuu gudagalay inuu u duceeyo Sheekha kol haddey gacan ka gar-darani dilayso.

Sheekh Muxumed jooji wardigii uu wadey,una diyaar-garoow inuu kor u kaco si uu askarta u raaco.Qofna qof kale lamuu hadlin, indhaha dadka waxaad  ka dareemaysay naxdin iyo argagax.Iyaguba Waa dil-sugayaal mindidu dul saaran tahay.
Sheekhu albaabka markuu ka sii baxayey waxaa la  arkayey dhaqdhaqaaqa tusbixiisa oo muujinaysay inuu wardigii dib u bilaabey.Malaha Illaahay ayuu ugu mahadnaqayey in gacan ka  gar-darani dishay,amase  askarta ayuu  u caqli celinayey:

*Diintiyo Quraankoon* *U dadaalo mooyee*
*Dalka iyo dadkayga midna* *Danbi kamaan galin*
*Daacadiyo miskiinkaa* *Darayeysan baan ahey*
*Danbi aanan galin iyo* *Hadaad igu dishaan tuhun*
*Dalaalkayga aakhiriyo* *Dumadiina weeyaan*

Maansadii dardaaran ee abwaan Cabdi Aadan”Qays”..

Markuu libdhay muuqii Sheekhu ayaa waxaad moodaysay inay  mar kaliya wada xasuusteen dadkii  qolkaa ku jiray  erayadii Cabdi Aadan”Qays” oo ay in badan waayo-arag  markaa u ahaayeen:

*Naf sadkeed buuxsamey*
*Soor miyaad la wadaagtey*
*Sagaalkii aroornimo*
*Sararkii baa madhan*
*Meeshii uu ku seexday*
*Iyo sartii way banaan tahay*

Dadkii waxay u kala jabeen laba kooxood.Kooxda ugu badan waxay ku tageen in Sheekha haddiisii gashey loona duceeyo,innaguna waynu ku xignaayee.Halka ay koox yari  soo jeedisay in Sheekha loogu yeedhay boorashkii aroornimo, odaygiina codsaday inaanu kaligii cuninee Sheekha lagu soo daro.Waxaa kaloo dadkii dhamaan isla qaateen in dilkii habeenimo lagu darey maalintiina oo SNM-tii soo dhawaatey,faro kululna ku hayso xabsiga.Sidaa darteed taliskii Afweyne ka hortagayaan inaaney SNM-tu sidii Jeelkii Madheera ka helin taageerayaal hor leh.
Iyadoo dadku wada dubaaxinayaan ayaa mar kaliya lagu sii wada jeestay jabaqda albaabka.Waa  askartii oo soo noqday,sheekhiina aanu la socon.Didsanaan hor leh ayaa dhalatey.Kumaa ku xiga, mise dhamaanteen si wadareed ayaa la inoo dilli  ayaa ka guuxaysay maanka qof kasta.

Hase yeeshee askartii iyagoon cidna la hadlin ayey bilaabeen inay gogoshii Sheekha kala daadiyaan,mid mid u baadhaan, kor iyo hoos u baadhaan, dhan walba jawaanka,bustaha, iyo go'a u rogrogaan. "Waxba kuma jiraan,haddaanu guntiga ku haysan" ayuu mid ka mid ahi ku dhawaaqey.

Laysla aqoonsey in la baxo.Gogoshii midba meel bay ku tuureen,inay sideedii ku celiyaana iskumay hawlin,xilna iskamay saarin.Tani waxay dadkii u sii cadeysay in Sheekhii godkii Aakhiro lagu sii hogaaminayo,gogol danbena aanu baahneyn.

la soco qaybaha danbe.

Ururintii iyo tifatirkii

Fu,aad Sheekh (somaliland@farshaxan.com )

Bahda mareegta Farshaxan

www.farshaxan.com iyo www.farshaxan.org